Waa maxay P-EBT

Pandemic Electronic Benefits Transfer (P-EBT) Waa faa iido lacageed oo loogu talagalay in laga caawiyo qoysaska si ugu iibsadaan cuntada, qoysaskaas oo leh carruur si ku-meel-gaar ah u wayday helitaanka cuntada dugsiga oo bilaash ah ama qiimo jaban ah taasi oo uu sababay xidhitaanka dugsiga ee xanuunka Covid 19 dartii ee wakhti kasta inta lagu jiro sanad dugsiyeedka 2020-2021.

Shuruudaha lagu heli karo P-EBT * waxaa lagu go'aaminayaa ka-qaybgalka Barnaamijka Qadada ee Qaranka, ee bilaashka ah ama qiimahiisu jabanyahay ee dugsiga, **iyo** maalmaha ardaygu waxbarashada dugsiga ku dhignayay khadka tooska ah (ku dhawaad 5 maalmood oo isku xigta).

> * Waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad la xiriirto dugsiga deegaankaaga ku yaal haddii aad jeceshahay inaad dalbato cunto bilaash ah ama mid qiimo jaban ah. Barnaamijka Utahns ee ka dhanka ah gaajada waxa uu leeyahay qaab uu ula xidhiidho dugsigaaga.

Sideen u ogaan karaa haddii aan u qalmo inaan helo P-EBT?
Si uu ardaygu u helo P-EBT , ardayda waa inay is qoraan si ay u helaan cunno dugsi oo bilaash ah ama qiimo jaban.

Qof kasta oo helay Barnaamijka kaalmada nafaqada ee dheeraadka ah (SNAP) laga bilaabo Sebtember 2020 illaa bishan hada lagu jiro iyo waxa uu u qalmaa inuu helo P-EBT, waxaanu hubin doonaa baaqiga kaadhkiisa EBT. Faa'iidooyinka lacageed ee ay ka helaan P-EBT-ga waxaa lagu dari doonaa kaarka EBT.

Qoysaska aan helin Barnaamijka kaalmada nafaqada ee dheeraadka ah, haddii aad u soo gudubto kaadh cusub ee P-EBT (oo la mid ah kaarka deynta) waa laguu soo diri doonaa, xitaa haddii aad mid heshay muddadii la soo saaray 2020. Dib ugu hubi boggan wixii macluumaad ah ee ku saabsan haddii iyo goorta gargaarka dheeraadka ah ee P-EBT diyaar noqdo ama la heli karo.

Schools included in the first issuance | Español

Sidee ayaan u Isticmaalayaa kaadhka?
Mar alla markii laguu oggolaado, waxaad kaadhka P-EBT ku heli doontaa boostada. Waxaad u baahan doontaa inaad kaarkaaga ka dhigto mid la isticmaali karo ka hor intaadan isticmaalin. Waxaad u isticmaali kartaa inaad iibsato cunno.

Raac tillaabooyinka hoose markaad isticmaaleyso kaarkaaga:

- Kaarkaaga ka shaqeysii ka hor dukaameysiga adoo dooranaya lambarkaaga sirta ah. Waxaad heli doontaa tilmaamo ku saabsan sida loo samaysto lambarka sirta ah (PIN) ee kaarkaaga.

- Soo dejiso barnaamijka mobilka ee 'Connetebt' ama isticmaal oo naftaada ka dhig mid aad u taqaan sida loo adeegsado websaydka connectebt.com.
- Ka hor intaadan dukaameysan, had iyo jeer hubi baaqiga lacagta kuugu jirta kaadhka.
- Markaad joogto Store, ka dooro EBT ee botomka iibka (ama mishiinka akhriyaha kaarka) (kaadh reader machine) ka dibna ku dhaqaaji kaarkaaga.
- Gali Lambarrkaaga sirta ah (PIN). Mashaniinka ayaa ku tusaya ****.
- Riix botomka OK ama ENTER.
- Lacag-hayaha ayaa galin doona xadiga aad iibsatay kaasi oo ka soo muuqan doona goobta iibka (point of sale) ama mishiinka kaadhka akhriya.
- HaddiII Qaddarka lacagtu sax yahay, riix botomka YES.
- Lacag-hayaha ayaa ku siin doona rasiidhkaaga. Fadlan Hubso in macluumaadka ku qoran Rasiidhku uu sax yahay.
- Risiidhka ilaasho, si marka danbe ee aad dukaamaysanayso aad u garan karto baaqiga kuugu jira kaadhka.

Kaararka P-EBT waxaa loo isticmaali karaa sida kaararka deynta oo kale ee yaala inta badan dukaamada iibiya cuntada. Waxaad ka arki kartaa liistada dukaamada la oggolaaday ee deegaankaaga adiga oo gelinaya nambarkaaga Zip Code retailer locator.

Liiskan hoose waxa uu ka kooban yahay waxyaabaha laguu ogol yahay iyo kuwa aan laguu ogolayn inaad ku iibsato..

Waxaad ku iibsan **KARTAA** cuntooyinka aan la diyaarin sida:

- Rooti iyo dalagyada (cuntada wadaniga ah)
- Miraha iyo khudradda
- Hilibka, kalluunka, iyo digaagga
- Waxyaabaha caanaha laga sameeyo
- Dhirta iyo midhaha si loo beero si cunto looga helo

Kuma **IIBSAN** kartid waxyaabahan soo socda:

- Cunnooyinka la diyaariyey, Tusaale ahaan., cuntooyinka kulul iyo cuntooyinka lagu cuni karo dukaanka laga iibsaday.
- Biir, khamri, alkahol, sigaar, ama tubaako
- Alaabada aan cuntada ahayn, Tusaale ahaan., cuntada xayawaanka, saabuun, waxyaabaha waraaqaha ka samaysan, alaabada nadaafadda
- Fiitamiinnada iyo daawooyinka
- Waxyaabaha nadaafadda u isticmaal qofku, tusaale ahaan, shaambadda, cadarada, dawada, cadayga iyo dawooyinka laysku qurxiyo.

Su’aalaha Mar walba la iswaydiiyo

Sideen u ogaan karaa haddii ilmahaygu u qalmo inuu helo lacagta P-EBT ?

Cunug kasta oo u qalma cuntooyinka bilaashka ah ama kuwa qiimahoodu jaban yahay sida (quraacda iyo / ama qadada) ama ka qeybgalka dugsi loo qoondeeyay in carruurta u qalma

cuntooyinkan ay heli karaan lacagta P-EBT-ga haddii iskuulkooda loo xiray ugu yaraan shan maalmood oo isku xigta inta lagu guda jiro sanad dugsiyeedka 2020-2021.

Ma waxa loo baahanyahay inaan codsado barnaamijkan?

Codsiga P-EBT looma baahna dheefaha lacageed ee barnaamijka P-EBT. Si kastaba ha noqotee, waa in lagu diwaangaliyaa qadada iskuulka ee bilaashka ah ama qiimo jaban. La xiriir dugsiga agtaada ah haddii aad jeceshahay inaad dalbato cunnooyin bilaash ah ama qiimaha jaban. Barnaamijka Utahns ee ka dhanka ah gaajada ayaa la xidhiidhi kara dugsigaaga.

Sidee ilmahaygu u helayaa lacagahan?

Faa'iidooyinka P-EBT waxaa lagu bixin doonaa kaadhka EBT, oo la mid ah kaarka deynta. Kaarkan waxaa laguugu soo diri doonaa boostada isaga oo wata tilmaamo ku saabsan habka looga shaqaysiinayo iyo adeegsiga kaarka EBT. Haddii aad horey u lahayd kaadhka EBT ee barnaamijka taageerada nafaqada ee dheeraadka ah, isla markaana aad u soo gudubtay inaad hesho lacagaha faa’iidada ah ee P-EBT, lacagta ayaa si otomaatig ah loogu dari doonaa kaarkaaga.

Goormaa la heli karaa lacagahan?

Faa'iidooyinka lacageed ee P-EBT-ga ayaa bilaabi doonta in la bixiyo usbuucii la soo dhaafay ee Maarso 2021. Waxaa la filayaa inaan soo saari doono lacag-bixinno dheeri ah bisha Maayo, Juun, iyo Luulyo ee sanadka 2021.

Ma lagu heli karaa ka qaybgalka hore?

Shuruudaha u qalmidda ama helitaanka lacagaha P-EBT * waxaa lagu go'aamiyaa ka-qaybgalka Barnaamijka Qadada Qaranka ee bilaashka ah ama qiimaha jaban iyo maalmaha ardaygu waxbarashada ku qaadanayay khadka tooska ah. Faa'iidooyinka waxaa loogu talagalay sanad dugsiyeedka 2020-2021. Waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad la xiriirto dugsiga agtaada ah haddii aad jeceshahay inaad dalbato cunnooyin bilaash ah ama qiimo jaban oo aad kala hadashid waqtiga aad u-qalanto in aad hesho lacagahan. Barnaamijka Utahns ee ka dhanka ah gaajada waxa uu leeyahay qaab uu ula xidhiidho dugsigaaga.

Halkee ayaan ku isticmaali karaa kaadhka P-EBT?

Waxaad ku isticmaali kartaa kaarka P-EBT dukaan kasta oo iibiyada cuntada tafaariiqda kaas oo aqbalay kaadhkaaga EBT ee barnaamijka taageerada nafaqada ee dheeraadka ah. Utah waxay leedahay in kabadan 1,400 oo dukaamo tafaariiqleyaal ah kuwaas oo oggolaaday oo aqbali kara inaad wax ku iibsato kaadhkaaga EBT ee SNAP. Tafaariiqlayaashan waxay u dhexeeyaan suuqyada waaweyn ilaa bakhaarada ku habboon kaadhkan iyo suuqyada beeraleyda. Waxaad ka arki kartaa liistada dukaamada la oggolaaday ee deegaankaaga adiga oo gelinaya nambarkaaga Zip Code retailer locator.

Ilmahaygu wali ma isticmaali karaa barnaamijka cunnada xagaaga ee dugsigooda isagoo qaadanayo lacagaha P-EBT?

Haa, ka qeybgalka barnaamijka P-EBT saameyn kuma yeelanayo barnaamijka cunnada xagaaga ee ilmahaaga ama u-qalmitaanka cunnada bilaashka ah ama qiimaha jaban ah.

P-EBT ma waxaa loo fahmayaa daryeel dadwayne?

Adeegsiga manfacyadaasi wax saameyn ah kuma yeelanayso xaaladdaada socdaal ee adiga ama ilmahaaga. Kharashka imtixaanka dadweynaha ma tixgelin doono faa'iidooyinka P-EBT.

Ilaa goorma ayay sii jiri karaan lacagahani?

Lacagahan waxaad isticmaali kartaa mudo 365 maalmood ah oo u dhiganta sannad.

Hadii aan jawaabtayda ka waayo su’aalaha mar walba la is waydiiyo ee halkan ku qoran, kuma ayaan taleefan ka wici karaa?

Lambarkan (833) 940-2990

Shuruudaha lagu helayo kaadhka (P-EBT)

EE CARUURTA GAADHAY XILIGA DUGSIGA.

Shaxankan waxaa loogu talagalay inuu ka caawiyo qoysaska Utah inay ku go'aan qaataan haddii ardaydoodu buuxiyaan shuruudaha P-EBT sanad dugsiyeedka 2020-2021. Dukumintigani ma damaanad qaadayo dheefaha lacagta laakiin waxaa kaliya loo isticmaalaa qalab waxbarasho ahaan iyo macluumaad dheeraad ah.

ARDAYGAAGU ma dhigtaa iskuul ka qeybgala Barnaamijka Qado ee Dugsiyada Qaranka?

HAA

Ilmahaagu ma ku guulaystay cuntooyinka dugsiga ee bilaashka ah ee qiimaha jaban ama ma dhigtaan dugsi ka qayb qaata adeegyada caawinta shuruurdaha helitaanka barnaamijkan (CEP)?

Iskuulada Utah waxay siiyaan cunto bilaash ah qoysaska sanad dugsiyeedkan. Tani macnaheedu maaha inay dhammaan ardayda si otomaatig ah u buuxiyeen shuruudaha lagu helayo lacagaha P-EBT. Kuwani waa laba barnaamij oo kala madax banaan.

HAA

ARDAYGAAGU MA DHIGTAA dugsi waxbarashada lagu qaato khadka tooska ah?

HAA

Heerarka dheefaha lacagtu waxay ku xidhantahay inaanay ardaydu helin cunnooyin maadama oo ay wax ku baranayaan tilmaamaha khadka tooska. Ardaydu xaq uma laha inay helaan P-EBT maalmaha wax dhigista shaqsi ahaaneed ee cuntada la heli karo.

MAYA

Ardaygaagu shakhsi ahaan ma u xaadirayaa iskuulka?

HAA

Heerarka waxtarka waxaa lagu go'aamiyaa haddii ardaydu aysan heli karin cunnooyinka inta ay ku jiraan maalmaha wax-dhigista qofka. Ardaydu xaq uma laha inay helaan P-EBT maalmaha wax dhigista shaqsi ahaaneed ee cuntada la heli karo.

MAYA

Nasiib darro, ardaygaagu xaq uma yeelan doono P-EBT sannad-dugsiyeedka 2020-2021. Fadlan booqo **jobs.utah.gov** si aad u hesho liiska macluumaadka diyaarka ah ama wac 211 haddii reerkaagu u baahan yahay gargaar cunto oo degdeg ah.

MAYA

Utah State Board of Education

DEPARTMENT OF WORKFORCE SERVICES